



Disaster Cash Assistance Program (Barnaamijka Caawinta Kaashka Masiibada)

Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiyo

Waa maxay Disaster Cash Assistance Program ama DCAP?

Department of Social and Health Services (Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka) waxay bilaabeysoo Disaster Cash Assistance Program (Barnaamijka Caawinta Kaashka Masiibada), ama DCAP, ka bilow Abriil 17, 2020. Barnaamijkaan waxaa loogu tallogalay inay caawiso qaar ka mid ah reer Washington inay buuxiyaan baahiyadooda aasaaska inta lagu jiro xaalada degdega gobolka ee ay sababtay xaalada degdega gobolka ee COVID-19.

Maxay tani u dhacaysaa?

Sida jawaabta u ah cudurka faafo ee COVID-19, Gofanatoore Inslee wuxuu ku dhawaaqay xaalada degdega gobolka oo dhammaan gobolada ku yaalo gobolka Washington. Tani waxay u ogolaataa DSHS inay ansaxiso faa'idooyinka sida waafaqsan Barnaamijka Caawinta Kaashka Masiibada ee qoysaska iyo shaqsiyaadka oo aan caadi ahaan ugu qalmeyn faa'idooyinka kaashka.

Sidee ayaan u codsadaa?

Barnaamijkaan wuxuu u baahanyahay wareysiga dhinaca taleefonka. Qoysaska waxay ku codsan karaan:

- Codshada onleenka ee WashingtonConnection.org iyo kadib adiga oo soo wacayo Xarunta Xiriirka Adeega Macmiilka ee 877-501-2233 si aad u dhameystirtid wareysiga loo baahantahay.
- Adiga oo soo wacayo 877-501-2233 si aad u dhameystirtid nidaamka codsiga oo dhan.
- Fadlan ka taxadir in Xarunta Xiriirka Adeega Macmiilka ay la kulmeysyo qiyamyo sareeyo oo waxaad la kulmi kartaa sugitaan dheer. Waqtiga ugu wanaagsan ee la soo waco waa ka hor 11 a.m. Waqtiga ugu mashquulka ah ee la soo waco waa 11 a.m. illaa 2 p.m.

Waxaan ku go'aansan karnaa u qalmidaada oo dhammaan barnaamijyadeena ah hal wareysi.

Intee jeer ayaan heli karaa caawintaan?

Barnaamijkaan waxaa loo heli karaa qoysaska kaliya hal bil oo muddo 12-bilood ah inta lagu jior xaalada degdega gobolka.

Illaa intee ayaa barnaamijkaan la heli karaa?

Kani waa barnaamij ku meelgaar ah oo wuxuu dhammaanayaa markii xaalada degdega gobolka dhammaato, ama ka dhaqsisan.

Ma heli karaa faa'idada kaashka DCAP xittaa haddii aanan laheyn carruur ila joogto?



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

Haa.

Ma heli karaa DCAP iyo barnaamijyada kale ee kaashka isla waqtigaas?

Maya. DCAP waa barnaamij kaash hal waqtii ah oo qoysaska aanan u qalmin barnaamijyada kale ee kaashka DSHS.

Waa maxay xadidnaanta daqliga ee barnaamijkaan?

Xadidnaanta daqliga go'an (kadib kajarida) oo dhammaan daqliga la filanayo bisha codsiga waxay ku saleysantahay cabirka qoyskaaga. Fiiri jadwalka hoose:

Cabirka Qoyska	Xadidnaanta Daqliga Ka jarida Kadib
1	\$363
2	\$459
3	\$569
4	\$670
5	\$772
6	\$877
7	\$1,013
8+	\$1,121

Ma jiraan xadidnaanta illaha ee barnaamijkaan?

Inta lagu jiro xaalada degdega hadeer, illaa \$6,000 oo illahaaga la heli karo ayaa laga dhaafaa. Sinnaanta oo illaa \$10,000 oo gaariga sidoo kale waa laga dhaafaa.

Warbixintee ayaan uga baahannahay wareysigeyga?

Inta lagu jiro wareysiga, waxaan ka hadleynaa dhammaan daqliga aad filaneysid bisha, illahaaga la heli karo iyo qarashaadka aad caawinta ugu baahantahay.

Qarashaad nooceee ayaan caawin u heli karaa?

DCAP waxay dabooshaa noocyada xigo ee baahiyada: Qarashaadka hoyga, koronatada, dharka, daryeelka caafimaadka yar, saadadka qoyska iyo qarashaadka gaadiidka ee shaqada. DCAP waxay sidoo kale ku caawin kartaa cuntada, kaliya haddii aadan u qalmin faa'idooyinka cuntada socota.



Waa maxay tirada faa'idada DCAP ugu badan?

Tirada faa'idada waxay ku xirantahay cabirka qoyskaaga, daqliga iyo baahida. Faa'idada ugu badan waxay ku qorantahay hoos:

Cabirka Qoyska	Tirada Faa'idada Ugu badan
1	\$363
2	\$459
3	\$569
4	\$670
5	\$772
6	\$877
7	\$1,013
8+	\$1,121

Sidee ayaan ku helaa faa'idooyinka?

Haddii laguu ansixiyo DCAP, faa'idooyinkaaga waxaa loo ansixinaya Faa'idada Wareejinta Korontada ah, ama EBT, kaarka. Haddii aadan laheyn mid, waxaan ku siineynaa mid. Kaarkaaga adiga ayaa laguu soo dirayaa boostada, illaa aad leedahay ciwaanka gaarsiinta guud.

Miyaan u baahannahay inaan muwaadin ahaado? Ka waran haddii aanan laheyn lambarka Amniga Bulshada?

Lagaama rabo inaad muwaadin Mareykanka ah ahaatid ama aad haysatid sharciga socdaalka si aad u heshid DCAP. Lacag bixin walboo DCAP waa laga reebay tijaabada dalacaada bulshada. Sidoo kale lagaama rabo inaad bixisid lambarka Amniga Bulshada si aad u heshid DCAP.

Miya warbixinteyda socdaalka lala wadaagayaa maamulada socdaalka faderaalka (Adeegyada Muwaadinka iyo Socdaalka Mareykanka)?

DSHS lama xaqijineyo warbixinta socdaal USCIS oo kuwa u qalma kaliya DCAP. Shaqsiyaadkaas ama qoysaskaas u qalma kaashka kale ama caawinta cuntada waxaa xaqijinayo sharcigooda socdaalka DSHS oo dhinaca [nidaamka SAVE](#) sida waafaqsan heshiiskooda kala dhaxeeyo USCIS.